

# Zama waa mid aad u wanaagsan!

 Michael Oguttu

 Vusi Malindi


 Abdi Muse

 Somali

 Level 2

(imageless edition)







Walaalkeyga yar wuxuu seexdaa waqti dambe. Anigu waxaan soo toosaa xilli hore, maxaa yeelay waa mid aad u wanaagsan!




Anigu waxaan ahay kan qorraxda  
soo bixiyo.




“Waxaad tahay xiddigta  
subaxdayda,” ayuu yidhi Mama.




Anigu waan maydhaa, ma u baahni  
wax caawin ah.



Waxaan u dul qaadan karaa biyo qabow iyo saabuun shiirayso oo buluug ah.




Mama aya i xasuusiyo, “Ha iloobin  
ilkaha.” Waxaan ku jawaabaa,  
“Marnaba, aniga ma ihi!”



Ka dib markii aan maydho, waxaan salaamaa awoowe iyo eedo, oo waxaan u rajeeyaa ayaga maalin wanaagsan.






Dabadeedna waan labistaa,  
“hadda waan weynahay Mama,”  
ayaan dhahaa.




Waxaan xidhi  
karaaguluusyadeeyda iyo suunka  
kabahayga.



Waxaan na hubiyaa in walaalkeyga  
yar uu yaqaano dhamaan wararka  
iskuulka.



Fasalka dhexdiisa waxaan ku dadaalayaa sida ugu fiican.



Waxyaabahan wanaagsan oo dhan  
waxaan sameeyaa maalin kasta.  
Laakiin waxa aan ugu jeclahay, waa  
in aan ciyaaro oo aan ciyaaro!



# Storybooks Canada

[storybookscanada.ca](http://storybookscanada.ca)

## Zama waa mid aad u wanaagsan!

Written by: Michael Oguttu

Illustrated by: Vusi Malindi

Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook ([africanstorybook.org](http://africanstorybook.org)) and is brought to you by [Storybooks Canada](http://Storybooks Canada) in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons  
[Attribution 3.0 International License](http://creativecommons.org/licenses/by/3.0/).